
Xisaab: Fasalka 1aad

Su'aasha Muhiimka ah ee #1aad:

Maxaan sameyn karaa si aan cunugeyga ugu diyaariyo Fasalka Kowaad?

Cunugaada wuxuu baran doonaa sida looga shaqeeyo nambarada si uu u xalliyo masalooyinka. Fursadaha soo baxa uu cunugaada ku kala sooci karo shay, ku tirin karo shay, ku aqoonsan qaabab, ku isticmaali karo mastarad ama xisaabiye waxay kordhin doontaa heerka kalsoonida uu ka gaaro fasalka kowaad.

Tan waxaa lagu sameyn karaa inta lagu dhex jiro hawsha caadiga ee maalinimada.



Su'aasha Muhiimka ah ee 2aad:

Maxuu baran doonaa cunugeyga inta uu ku jiro fasalka 1aad sannadka oo idil?

Fasalka 1aad, waqtiga waxbarashada waa in ahamiyadda la siiyo afar qeyb oo muhiim ah:

- Horumarinta fahamka xariirka ka dhexeeyo nambarada buuxa, booska uu kaga jiro, kana mid ah marka leysugu geeyo toban toban iyo hal hal. Horumarinta fahamka isku darka, kala goyska, iyo xiiladaha isku darka iyo kala goyska ilaa 20
- Horumarinta fahamka cabbirka toosan iyo dhererka lagu cabbiro unugyada dhererka
- Sababta ku saabsan sifeynta, isu keenidda, iyo kala jejebinta qaababka jomitriyada

Maxaan ku sameyn karaa guriga si aan u taageero waxa laga barto dugsiga?

Waxay qaadataa waqti iyo waayo badan si caruurta garasho buuxdo uga gaaraan nambarada kor u kici doono oo isu baddali doono fikrado horumarsan oo la xariira nambarka xagga darajooyinka sare. Fikradahaan aasaasiga ah waxaa la gaarsiin karaa nambaro waaweyn iyo fahamka xaqiiqado aasaasi ah iyo xisaabin.

Tiri ilaa 20

Ku bilow tirinta la raaciyo magaca shayga la tiriyo ilaa 20. Nambarada tobanka (11-19) aad ayay u adag yahiin, waxaana dhici karto in loo baahdo in si gaar ah loo fiiriyo laga bilaabo fasalka 1aad.

Cunugaada ha isticmaalo tabaashiir si uu sadarka nambarada (1-20) ugu qoro dhinaca lagu socdo dibadda. Marka tirinta u noqoto sax, aadna ugu fududaato, ku dhawaaq nambar kaddibna cunugaada ha ku boodo nambarkaas.

Marka tirinta u noqoto sax, aadna ugu fududaato, ku dhawaaq nambar kaddibna cunugaada ha ku boodo nambarkaas. Tan waxay ku tustaa in uu aqoonsaday nambarkaas. Samee tilmaamo sida "Ku bood nambarka labo ka yar" ama "Ku bood nambarka 1 ka badan" kaddibna cunugaada ha ku dhawaaqo nambarka cusub. Waxaad siisaa tilmaamo kale oo dhowr ah kaddibna cunugaada ha ku dhawaaqo tilmaamaha inta aad boodeysid. Haddii aadan haysanin tabaashiirta lagu qoro dhinaca lagu socdo, isticmaal warqad, krayon, iyo faraha.

Buugaag la Wada Akhriyo:

Just Enough Carrot, Stuart Murphy

Inta bakeylaha iyo hooyadiis ay dukaanka raashinka ka iibsanayaan qadada martida, akhristaha wuxuu tirin karaa, wuxuuna isbarbar dhigi karaa karootada, looska, iyo tixriga ku jira gawaarida raashinka dadka kale ee wax ka iibsada dukaanka.

Artic Fives Arrive, Elinor Pinczes

Waa buug ku saabsan tirinta, halkaas ay xoolaha, iyagoo u socda sida kooxo ka kooban shan shan, u qeybsadaan meesha ugu sareyso buurta si ay u arkaan iftiinka waqooyi.

One Hundred Hungry Ants, Elinor Pinczes

Hal boqol dhuuro baahan oo dibadda u soo baxa si ay macmacaan u geliyaan calooshooda, balse joogsada si ay u baddalaan qaabka safkooda, iyaga oo muujiya qeybo kala duwan oo ka kooban hal boqol, taasoo sababta in ay dhamaadka lumiyaan waqti iyo raashin labadaba.

Isbarbar Dhig Nambarada

Waxaad si isla'eg u qeybsataan turub adiga iyo cunugaada kaddibna hoos u jeedi wijiga turubta. Marka qof kasta la gaaro tookadiisa, cayaartooyda waxay kor u soo jeediyaan wijiga turubta kaddibna waxay go'aan ku gaaraan qofka haysta nambarka ugu weyn. Cayaartooygaas wuxuu soo aruuriyay labada turub. Sii wad cayaarta ilaa la isticmaalo dhamaan turubta.

Isbaddalka: Cayaartooyga haysta nambarka ugu yar, ha qaato labada turub.

Labo labo (2s), shan shan (5s), iyo toban toban (10s) u tiri

Afka ka tiri labo labo (2s), shan shan (5s), iyo toban toban (10s), marmarna adiga oo ka bilaaba 0.

0…2…4…6…8…10…12…14…16…18…20…22…24…26……..(sii soco)

0…5…10…15…20…25…30…35…40…45…50…55…60…65……(sii soco)

0…10…20…30…40…50…60…70…80…90…100…110…120…..(sii soco)

Buugaag la Wada Akhriyo:

Two Ways To Count To Ten: A Liberian Folktale, Ruby Dee

Dib u sheegidda sheeko laga soo qaaday hiddaha Liberia halkaas uu Boqorka Leopard ku casumo dhamaan xoolaha in ay ka soo qeybgalaan tartanka tuurista waranka, kii ku guuleystana uu guursan doono gabartiisa kana dhaxli doono boqortooyada.

One Hundred Hungry Ants, Elinor Pinczes

Hal boqol dhuuro baahan oo dibadda u soo baxa si ay macmacaan u geliyaan calooshooda, balse joogsada si ay u baddalaan qaabka safkooda, iyaga oo muujiya qeybo kala duwan oo ka kooban hal boqol, taasoo sababta in ay dhamaadka lumiyaan waqti iyo raashin labadaba.

Tirinta Nambarada Odd Numbers, Jerry Pallotta

Wuxuu soo bandhigaa macluumaad ku saabsan xoolo ku nool badda oo kala duwan, laga bilaabo malayga diilamaha leh ilaa 50 yaxaas oo baluug ah.

Akhri kaddibna Qor nambarada ilaa 120

Ku celceli qorista nambarada adiga oo isticmaala waxyaabo kala duwan: qalmaan, calameeyeyaal, krayon, rinji, carro. Samee nambaro adiga oo isticmaala suuf kuuskuusan, qoryaha farshaxanka, qoryaha ilkaha lagu nadiifiyo, ama dhagaxyo.

Dooro saddax nambar uu midkiiba ka kooban yahay hal nambar. Weydii cunugaada in uu qoro nambarka ugu yar iyo nambarka ugu weyn iyadoo la isticmaalaayo dhamaan saddaxda nambar. Tusaale ahaan, marka la isticmaalo 4, 2, iyo 7, nambarka ugu yar waa 247, nambarka ugu weyna waa 742.

Aqoonso Lacagta Birta kaddibna Hel Qiimaha Labo Lacag Bir ah

Cunugaada ha ku cayaaro hana tiriyo doolarka iyo lacagta birta ah ee ku jirta boorsadaada isaga oo u kala qeybiya penny, nickel, dime, quarter iyo lacagta warqadda.

Idinka oo wadajira, ka dooda waxyaabaha aad iibsan kartiin ama isticmaala xayaysiinta wargeysyada si aad u heshaan shay aad iibsan kartiin.

Iska dhig bangiile kaddibna waxaad 10 penny ku baddashaa hal dime, 2 nickel.

Samee sheekooyinka nambarada waxaadna sheekada soo gelisaa labo lacagta birta ah ama ka badan. Tusaale ahaan, "Aniga waxaan rabaa in aan bur sokorow ku iibsado 15 senti, maxay yahiin lacagaha birta ee aan u baahanahay?"

Soo bandhig kana Shaqee Masalooyin loo Isticmaalo Isku Daridda iyo Kala Goyska ilaa 20.

Cunugaada ha sameeyo hana kuu sheego sheekada nambarka ee la socoto isku darka ama kala goynta ilaa 20. Tusaale ahaan, waxaad tiraahdaa “6+8=14”. Cunugaada wuxuu yiri, "Saakay, waxaa deydka dambe ku jiray 6 bakeyle yaryar. Marka aan guriga tagay aniga oo ka imid dugsiga, marka leysku daro, waxaa jiray 14 bakeyle yaryar. Waxaa yimid sideed bakeyle inta aan ku sugnaa dugsiga."

Buugaag la Wada Akhriyo:

Subtraction Action, Loreen Leedy

Wuxuu soo bandhigaa kala goys iyadoo la adeegsanaayo hawlaha ay qabtaan ardayda xoolaha ee joogta carwada dugsiga. Waxaa ku jira masalooyin loo baahan yahay in akhristaha uu xalliyo.

Addition Mission, Loreen Leedy

Ina Prime iyo ardaydeeda xoolaha waxay sahmiyaan isku darka iyaga oo tusalooyin badan ka hela dunida ku wareegsan.

Grandfather Tang’s Story waxaa qortay Ann Tompert

Awoowe ayaa ka sheekeeya sheeko ku saabsan sheekooyinka dawacada baddasha qaabkeeda oo ku tartanta midba midka kale in uu ka fiican yahay ilaa ugaarsade uu labadaba geliyo halis.

How Many Blue Birds Flew Away?: A Counting Book With A Difference, Paul Giganti

Inta maalinta socoto, cunug ayaa wuxuu ogaadaa, tiriyaa, kaddibna isbarbar dhigaa tiro shay, sida meeqa wiilal iyo gabdho ayaa ku sugan barxadda lagu cayaaro iyo intee gabdho dheeraad ah ayaa ku sugan meesha marka loo fiiriyo wiilasha, ilaa ugu dambeynta laga gaaro wax aan la tirin karin.

Twenty Is Too Many, Kate Duke

Sheeko ku saabsan labaatan qansiir oo dhul iyo bad mareen ah ayaa muujisa habka kala goynta marka nambaradooda soo yaradaan.

Aqoonta Isku Darka iyo Kala Goyna ilaa 10

Waxaad god kasta oo ku yaal kartoonka ukunta ku calameysaa nambarada 0-11. Waxaad gudaha kartoonka gelisaa labo penny, ku xer daboolka, kaddibna lul. Adiga oo isticmaala nambarada labada qeyb, meesha penniga ku fadhiistay, samee masalada isku darka ama kala goynta.

Hel dhamaan siyaabaha leysugu geyn karo 10. Soo saar 10 penny ama tiriyeyaal. Waxaad qaar ka mid ah penniyada gelisaa gacan kasta Fur gacmaha kaddibna sheeg isla'egyada. Kaddibna qor si aad u heshid dhamaan isu geynta.

Buugaag la Wada Akhriyo:

Adding, Rozanne L. Williams

Qor liiska sifeeyeyaasha

Fiiri qaababka jomitriyada agagaarka guriga, suuqa weyn, dhismooyinka, iyo calaamadaha jidadka. Cayaar cayaarta "WAAN AKRAA." Tusaale ahaan: "Waxaan fiiriyaa lex geesle baluug ah" (xagga barkinta fadhiga).

Buugaag la Wada Akhriyo:

Inchworm And A Half, Elinor Pinczes

Dhowr tixri yaryar ayaa isticmaala isbadbaddalka dhererkooda si ay u cabbiraan khudaarta ka baxda beerta

Buugaag Badan oo la Wada Akhriyo:

A Place for Zero, Angeline Sparagna LoPresti

Inta Zero raadinaayo booskiisa, wuxuu ogaaday isla'egyada isku darka iyo isku dhufashada, kaddibna wuxuu sameyay boos hayn.

Measuring Penny, Loreen Leedy

Lisa waxay wax ka baratay xisaabta cabbirka iyada oo eeygeeda Penny ku cabbirtay dhamaan unugyada lagu cabbiro, sida bound, inji, raashinka eeyga, iyo suufka dhagaha lagu nadiifiyo.

All In One Hour, Susan Crummel

Sheekadaan oo isku si dhawaaqda, mukulaal ayaa waxay ka daba orodaa doonli bartamaha habeenkii, taasoo dhalisaa iska daba orod badan oo adag.

Pigs on the Ball: Fun with Math and Sports, Amy Axelrod

Qoyska Pig ayaa booqday meel yar oo lagu cayaaro golf, kaddibna wuxuu ogaaday qaababka, xagalada, iyo jomitriyada.

The Greedy Triangle, Marilyn Burns

Isaga oo aan ku qanacsaneyn qaabkiisa, saddax geesle ayaa wuxuu ka codsaday baddalaha qaabka in uu xariiqman iyo xagalo badan ku daro ilaa uusan ka ogaanin dhinaca kor jira.

Pattern Bugs, Trudy Harris

Garashada Sasaanka - Suugaanta Dhalinta

The Clock Struck One: A Time Telling Tale, Trudy Harris

Qoraal isku si u dhaca ayaa wuxuu ku sii balaartaa heesta isku si u dhacda ee loo qaado caruurta, "Hickory Dickory Dock," inta mukulaasha ay doonliga ku raacdeyso kor saacadda, waxaana daba socda xoolo kale, ilaa habeen bar laga gaaro kaddibna hurdo la dhacaan xoolahi oo daalay. Waxaa ku jira xaqiiqo ku saabsan saacadaha iyo macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan sheegidda waqtiga.

Tally Cat Keeps Track, Trudy Harris

Mukulaasha Alley Talley McNally waxay jeceshahay in ay tiriso iyo waxay jeceshahay in ay guuleysato, hase ahatee marka midabkiisa ku wanaagsan tartanka uu dhibaato u keeno, waa in uu isku haleeyo asxaabtiisa si uu helo kaalmo.

Xisaabta Loogu Talogalay Dhamaan Xilliyada: Mind Stretching Math, Greg Tang, Counting & Arithmetic -- Suugaanta Dhalinta

Math Fables, Greg Tang

Taxane isku si u dhaca oo ku saabsan xoolaha waxay soo bandhigaan tirinta iyo nambarada leysu geeyo, iyo tusalooyin ku saabsan dabeecadaha noocaas sida wada shaqeynta, saaxiibnimada, iyo soo dhaweynta.

A Fair Bear Share, Stuart Murphy

Afar ka mid ah ilmaha oorsada ayaa soo aruuriyay waxyaabaha lagu daro macmacaanka blueberry, iyaga oo tiriya kaddibna dib u tiriya bacdamaa saadkooda soo bato

The Penny Pot, Stuart Murphy

Qolka rinjieyeynta wijiga ee laga helo carwada dugsiga wuxuu bixiyaa fursado badan oo lagu tiriyo isu geynta laga sameeyo lacagta birta ah marka leysku daro ilaa qonton.

100 Days of Cool, Stuart Murphy

Afar arday ayaa yimid dugsiga maalinta kowaad iyaga oo heer sare ah, macalinkoodana wuxuu ku adkeyay in ay iska tiiriyaan inta ay tirinayaan boqol maalin ilaa laga gaaro xuska heerka sare ah.

*Dhamaan buugaagta la soo qoray waxaa laga heli karaa Maktabyada Dadweynaha Denver (Denver Public Libraries)

CAYAARAHA GANACSIGA EE KAALMEEYA FAHAMKA XISAABTA

- Uno
- Sideedda Waalan
- Waxaa la heli karaa cayaaro badan oo wanaagsan oo ku shaqeeya elataroonigga.

Kuwaan waxay kaloo kaalmo u yahiin fahamka xisaabta:

- Xujooyinka Jiqsaw:
- Xujooyinka Qaababka Leysku Toosiyo (Tangrams)
- Cayaarta Boorka Masaska iyo Jaranjarada
- Arday kasta oo ku jira DPS wuxuu leeyahay kood uu ku cayaaro cayaaraha Everyday Math lagana helo internetka www.everydaymathonline.com.
    - Dhamaan heer kasta cayaaraha Xisaabta Maalin kasta waxaa heli kara arday kasta.
    - Ardayda waxay u baahan yahiin in ay erayga lagu galo (password) ka helaan macalimiintooda.

- Cayaarta Checkers
- Markabka Dagaalka
- Cayaaraha Kaarka Xasuusta
- Isku Xer Afar

Su'aasha Muhiimka ah ee 3aad:

Sidee ayaan ku kormeeraa horumarka iyo waxbarashada cunugeyga sannad dugsiyeedka oo idil? Maxay yahiin ilaha aan isticmaali karo si aan sidaas u sameeyo?

- Mar kasta, waxtar ayay leedahay in aad soo booqatid fasalka xisaabta cunugaada, aadna aragtid sida loo wado, waxa laga filaayo cunugaada, iyo shaqada uu qabto cunugaada. Haddii ay jiraan arrimo, shir la qaado macalinka, adiga oo kula xariira xataa email ama telefoon.
- La fadhiiso cunugaada kaddibna ha sharaxo waxa uu sameeyo inta uu ka shaqeeynaayo shaqada guriga.